

# Ogeysiiska Khidmadaha Dugsiga Qoysaska iyo Ardayda ku jirto Darajooyinka 7-12



## Sharciga Utah wuxuu ogol yahay in dugsiyada ay khidmad ku soo dallacaan darajooyinka todobo ilaa toban iyo labo.

Waxaa dhici karto in ardayga lagu eedeeyo khidmadaha ka-qeybgalka fasalada dugsiga, hawlaha iyo brograamyada. Ardayga lagama codsan karo ama lagama dooni kari in uu bixiyo khidmad haddii la soo codsigaas ama shardigaas uu soo ogolaado Guddiga Waxbarashada (Board of Education) laguna soo daro jadwalka khidmadda dugsiga ama dagmada.

**Sharciga Utah wuxuu rabaa** in dugsiyada oo dallaca khidmadaha hubiyaan in ka-dhaafidda khidmadda ama sharciyada kale baddalkii ka-dhaafidda khidmadda la siin lahaa ardaya qoyskiisa uusan awoodin in uu bixiyo khidmadda.

## Sharaxaadda Khidmadda

Khidmadda waxaa lagu magacaabaa sida shay qiimo lacag leh oo la codsado ama uu dugsiga u rabo arday in uu ka qeybgalo hawl, fasal, ama brograam la bixiyay, mas'uul laga yahay, ama uu taageero dugsiga, dugsiga gaarka, ama dagmada. Codsigaan ama shardigaan waa waxay ahaan karaan wax si dadban loo sheego. Macnaha in haddii uu jiro shay aan loo baahneyn si looga qeybgalo, balse weli jiro wax laga filaayo ardayga in uu haysto shaygaas, kaasi wuxuu noqon doonaa khidmadda dugsiga. Hoos waxaa ku qoran qaar ka mid ah tusaalooyinka khidmadaha:

- Khidmadaha diiwaan gelinta
- Khidmadaha buugaagta
- Khidmadaha ka-qeybgalka
- Kharashka ku baxa fasalka ama safarada kooxda (sida jiiifka, nolosha, iyo cuntada)
- Khidmadaha gelitaanka masraxa dugsiga ama cayaaraha
- Kharashka kliinikada kubadda cagta kuleylaha
- Khidmadaha brograamka dugsiga-kaddib
- Ganaaxa goynta dugsiga
- Kirada qalabka

Kharashka faraantiyada fasalka, buugaagta sannadka, sawirada dugsiga, jaakooyinka kor laga geliya warqadaha, iyo waxyaabaha la midka ah ma aha khidmado mana loo baahna in laga dhaafo. Sidoo kale, haddii ardayga lumiyo ama khasaariyo hantida dugsiga, kharashka baddalaadda ama hagaajinta aysan ahayn khidmado loona baahneyn in laga dhaafo.

Waxaa dhici karto in ardayda laga dalbado in ay bixiyaan khidmadaha koorsooyinka diiwaan gelinta la socota ama imtixanaadka meeleynta sare. Qeybta khidmadaha sida gaarka ah ula xariira darajooyinka dugsiga kaddib ama kulliyadda ama buundooyinka laguma qaadi karo ka-dhaafidda khidmadda. Hase ahaatee, Guddiga Kulliyadda wuxuu kharashkaan ka yareeyaa kuwa xaqa u yeesha.

## Ka-Dhaafidda Khidmadda

Ardayga wuxuu xaq u leeyahay ka-dhaafid haddii:

- qoyska qaato maalgelinta TANF (kuboonka)
- raashinka Brograamka Shaqada Qoyska (Family employment Program) gobolka;
- ardayga qaato SSI (Dakhliga Sekuritiga Dheeraadka)
- ardayga ku jiraa daryeelka korinta;
- ardayga ku sugan yahay xabsiga gobolka; ama
- ardayga wuxuu xaq u leeyahay sida ku saleysan dakhliga qoyska/reerka (heerarka waxay la yimaadaan xisaab la'eg kuwa xaq u yeeshaha qadada lacag la'aanta).

Ka-dhaafidda khidmadda waa ka dhaafidda shardiga in la bixiyo khidmadda. Haddii ardayga xaq u yeesho ka-dhaafidda khidmadda, **waa in laga dhaafo dhamaan khidmadaha**. Haddii aan si gaar ah loogu sheegin sharciga gobolka, dugsiga waa in uu ka dhaafo dhamaan khidmadaha, meel kasta uu ardayga iska dhaafi karo in uu ka qeybgalo. Tan macnaheeda waxay tahay in ardaydaas xaqa u yeelata ka-dhaafidda khidmadda ka qeybgeli karaan fasal kasta aa hawl kasta oo ka jira dugsiga, lacag la'aan.

*\* Ardayga wuxuu kaloo xaq u yeelan karaa ka dhaafidda khidmadda haddii uusan la kulmin heerarkan mid ka mid ah balse weli awoodin in uu bixiyo khidmadda. Fadlan fiiri duglsiga hoose ama siyaasadda u dagsan dagmada si aad u heshid macluumaad badan.*

# Ogeysiiska Khidmadaha Dugsiga ee 7-12 sii socda

## Sii Socota Ka Dhaafidda Khidmadaha

Haddii ardayga uu rabo in uu dalbado ka-dhaafidda khidmadda, waxaa la weydiin doonaa in ay la yimaadaan warqadaha xaq u yeelashada ka-dhaafidda, taasoo qeyb ka ah hawsha arjiga.

Si uu u dalbado ka-dhaafidda khidmadda, ardayga wuu soo gudbin karaa “Arjiga Dalabka Ka-Dhaafidda Khidmadda (Darajooyinka 7-12)”. Koobiga arjiga waxaa la soo raaciyay ogeysiisnaan, hase ahaatee arjiyo dheeraad ah waxaa laga heli karaa xafiiska dugsiga, ama bogga internetka khidmadaha dugsiga gobolka ee ku qoran dhamaadka warqadaan.

Kaddib marka warqadahaan loo gudbiyo dugsiga, waa laga joojin doonaa sharuudaha khidmadda, ilaa go’aan kama dambays ah laga gaaro xaq u ardayga u leeyahay ka-dhaafidda khidmadda.

Haddii arjiga la soo diido, dugsiga wuxuu soo diri doonaa “Foomka Go’aanka iyo Racfaanka” (“Decision and Appeals Form”). Foomka wuxuu sharaxi doonaa sababta loo soo diiday arjiga iyo sida racfaan looga qaato go’aanka.

Xasuuso in aad mar kasta haysatid koobi. Haddii racfaan laga qaato diidmada ka-dhaafidda khidmadda, looma baahan in la bixiyo dhamaan khidmadaha ilaa go’aan laga gaaro racfaanka.

## Deeqda, Qarsoodiga, iyo Hirgelinta Khidmadaha

Maaliyadda dugsiga waa kooban yahiiin, waxaana dhici karto in dugsiga u baahdo kaalmo taasoo dheeraad ku ah khidmadaha. Natiijo ahaan, dugsiga wuxuu weydiisan karaa in canshuurta laga dhimo deeqda saadka dugsiga, qalabka, ama lacagta, balse dugsiga kama dalban karo deeq.

Magaca ardayga waa qarsoodi mana loo kashifi karo qof aan jid u lahayn iyo baahi u qabin macluumaadka, iyadoo aan la fiirin haddii ardayga uu bixiyo khidmadda, deeqda, iyo wax ku biirinta ama haddii kale, ama uu dalbaday, qaatay, ama loo diiday ka-dhaafidda. Hase ahaatee, waxaa dhici karto in dugsiga oo ogolaasho ka haysto deeq bixiyaha, in uu aqoonsi ku habboon siiyo qof kasta ama urur kasta oo deeq badan ama wax ku dara dugsiga.

Dugsiga iyo shaqaalaha dugsiga ma reeban karaan, ma yareyn karaan, ama xoojin karaan darajooyinka ama buundooyinka, ama ceshan karaan darajooyinka, jadwalada fasalka, buundooyinka, shahaadada, warbixinta, ama dibloomada si loo hirgeliyo bixinta khidmadaha.

Si aad u heshid macluumaad badan: La xariir dugsiga:

Magaca: \_\_\_\_\_ Telefoonka: \_\_\_\_\_

Email: \_\_\_\_\_ Bogga Internetka: \_\_\_\_\_

La xariir Xariirka Khidmadaha Dugsiga dagmada (School Fees Contact):

Magaca: \_\_\_\_\_ Telefoonka: \_\_\_\_\_

Email: \_\_\_\_\_ Bogga internetka: \_\_\_\_\_

Fiiri bogga internetka dugsiga gobolka: <https://schools.utah.gov/schoolfees>